



Ku martigalinayna dhallinta aad dugsiga dhigan inay “Come Home to Minneapolis” doortaan marin qalin jabin

Maqaal Wargays (Newsletter Article)

Ololaha dhallinta ee magaalada oo idil ah ayaa rajeynaya inuu soo jiito 200 dhallinyaro ah oon dugsiga ku jirin inay dugsiga ku soo laabtaan dayrtan

Dugsiyada dadweynaha Miniyaaboliis iyo Golaha Xiriirka Dhallinyarada ayaa isku biiriyey cududooda, si ay sare ugu qaadaan wacyi galinta dadweynaha ee la xiriira dhibaatooyinka ka bixidda dugsiga iyo bugcadda Qalin jabinta Miniyaaboliis, isla markaasna ay qoraan taageerada bulshada oo idil si ay u xalliyaan. “We Want You Back” ayaa ku martigalinaya dhallinyarada aan ku qornayn, inay ku soo laabtaan dugsiga, dhammatystirtaan dhibcahooda isla markaasna qaataan shahaadadooda. Muhiimmadda yoolka barnaamijkaani waa in dib loo soo jiito 200 dhallinyaro ah isla markaasna marinkooda la galiyo, si ay u noqdaan ku guulaysta. Dugsiyada Dadweynaha Miniyaaboliis ayaa la shaqaynaya Xaruumaha Dhexe ee Waxbarashada (Area Learning Centers), Iskuullada wax lagu beddesho iyo casharrada lagu qaato on-line, si loo abuuru barnaamij soo jiidanaya dhallinyarada aan dugsiyada ku diiwaan gashanayn. Waxaa xiriirro lala sameeyey hawlgallo ilaha bulshooyinka kala duwan ee ka jira magaalada oo idil, si loo sameeyo wax kasta oo ay u baahan yihiin dhallinyaradu inay qalin jabiyaan.

Arday fara badan ayaa ka taga dugsiga inta ayan qalin jabin sababo kala duwan awgood. Halka qaarkood laga yaabo inay iska qoraan degmo kale, kuwo kalena ismaba qoraan. Halkaasi oo Dugsiyada Dadweynaha Miniyaaboliis ay ku adag tahay inay meesha ay joogaan ogaadaan. Qaar ka mid ah ardaydeennaasi hore ayaa aad ugu dhow inay kasbadaan Shahaadadooda, ayna ka dhimman yihiin dhibo yar ama dhibo ay ku gudbaan mid ka mid ah imtixaannada gobolka.

Golaha Xiriirka Dhallinyarada ayaa qorshaynaya inuu isu uruuriyo, tababarana ilaa 1,000 naftood hure. Si ay ula xiriiraan dhallinyaran doonaysa inay dugsiga ku soo laabtaan. Xeeladaha ololaha waxaa ka mid ah abaabul bulsho ee xagaaga oo idil iyo dhacdooyin ka badan 30 shir, si loo dhaqaaqiyo wacyi galinta, ayna ka mid tahay albaab garaacid magaalada oo idil. Sabtida labaad marka iskuulku bilawdo, Setember 11, 2010. Shaqaalaha Dugsiyada Dadweynaha Miniyaaboliis ayaa diyaar u noqonaya inay isla goobtaasi ku diiwaan galiyaan maalintaasi.

Iyadoo dhacdooyinka albaab garaaciddu ay abuurayso wacyi galin lixaad leh “xilliga ku laabashada sannad dugsiyeedka”, We Want You Back I ma aha dhacdo hal mar keliya ah. Dugsiga, Magaalada, degmada iyo hay'adaha bulshada ayey ka go'an tahay inay sameeyaan wadaag joogto ah oo socda. Kaasoo u diraya dhallinyarada taageero joogto ah ay ay u guulaystaan.

We Want You Back ayaa ku salaysan ku dayasho guul leh kaasoo ka shaqaynaya magaalooyinka sida Houston iyo Philadelphia. Kormeere Guud Bernadeia Johnson, Duqa Magaalada R.T. Rybak iyo Xeer Ilaaliyaha Hennepin County Attorney Mike Freeman ayaa si wadajir ah Ololahan shir guddoominaya. Ololaha ayaa sidoo kale doonaya taageerada iyo qaban qaabo dadweynaha, Hay'adaha gaarka ah iyo Ururrada aan faa'iido doonka ahayn.

Sideed U Caawin Karta

Ololaha We Want You Back ayaa raadinaya naftood hureyaal ka caawiya inay la xiriiraan dhallinyarada aan dhammaynin dugsigood/iskoolka.

Ku xir dhallinyarada barnaamijyada dugsiga iyo adeegyada soo socda:

- Carwada Xagaaga ee deriska iyo dhacdooyinka. Mutadawac noqo 2-4 saacadood.
- Sabti, Agoosto 14 and Axad, Agoosto 15 I dhiirrigali (Empower Me!) Shirweynaha Dhallinyarada ee Minneapolis Convention Center.
- Sabti, Setember 11
Ku biir boqolaal dad wada lugaynaya, qaybinaya dhambaal sideyaal, lana wada hadlaya jiiraanka magaalada oo idil.
- Naftood hureyaal labo luqoodle ku hadla Spanish, Hmong ama Soomaali aya loo baahan yahay.

Hadii aad rabto inaad noqoto nafti hure, fadlan booqo shabakadda

www.wewantyoubackmpls.org

Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato nafti hurenimada iyo frusadaha qaban qaabada, kala xiriir Jo Haberman, Golaha Xiriirka Dhallinyarada (Youth Coordinating Board), 612-673-2720 or wwyb@ycb.org.

Haddii aad garanayso qof dhallinyaro ah oo doonaya inuu dib ugu laabto iskoolka, ama doonaya inuu wax ka ogaado barnaamijyada Dugsiyada Dadweynaha Miniyaaboliis & adeegyada, kala xiriir Mary Barrie, Minneapolis Public Schools lam 612-668-0721 ama shabakadda mary.barrie@mpls.k12.mn.us.